

IIB MA GALO

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka Taad Muqdisho

12 Diseember 1979 L. 1 R 12

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba **RUKUNKA :** Sanad-kii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

K O O B N I I N

Q A Y B T A K O O W A A D

S H A R C I

W. M.

Q A Y B T A L A B A A D

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 67 ee 1 Seb. 1979 — Guddiga Maamulka Sare.

Q A Y B T A S A D D E X A A D

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

«SHIRKADDA G. GUUD ALLAMAGANS»

OGEYSIIS, ISU YEERID SHIR CAADI AH — L. 595

Wakaaladda M. Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 67, ee 1 Set. 1979 Guddiga
Maamulka Sare.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-
caanka;

MARKUU ARKAY : Heshiiska dhex maray Jamhuuriyadda
Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Carabta ee
Liibiya ee la saxiixay 17kii Jennaayo 1972 iyo nidaamka
(Statute) ee Shirkadda Libsoma;

MARKUU ARKAY : Xeer L. 23 ee 7dii Febraayo 1976;

MARKUU ARKAY : Baahida loo qabo in la magacaabo Maa-
mulka Sare ee Shirkadda Libsoma;

ISAGOO TIXGELINAYA : Taladda uu soo jeediyay Wasiirka
Wasaaradda Beeraha.

WUXUU XEERAY

QODOBKA 1AAD

Wasiirka Wasaaradda Beeraha iyo Wasiirka Wasaaradda
Maaliyadda waxay Wakiil uga noqon doonaan Dawladda Soo-
maaliya Golaha Guud (GENERAL ASSEMBLY) ee Shirkadda
Carabta ee Horumarinta Beeraha ee Soomaaliya iyo Liibiya
(LIBSOMA) isagoo Wasiirka Wasaaradda Beeraha uu ahaa
doono Guddoomiyaha Golaha Guud ee dhinaca Soomaalidda.

QODOBKA 2AAD

Dhinaca Dawladda Soomaaliya, Guddiga Maamulka Sare
ee Shirkadda Libsoma wuxuu ka koobmaa :

Jaalle Ing. Maxamed Buraale Faarax — Maareeye Guud
(Xubin joogto ah), Darajadiisuna ahaan doonto A2 Sare;

Jaalle Axmed Maxamed Xuseen — Maareeye
(Xubin joogto ah), Darajadiisuna ahaan doonto A3 Sare;

Jaalle Aaden Cumar Ileeeye — Maareeye
(Xubin aan joogto ahayn), Darajadiisuna ah A 3 Sare.

QODOBKA 3AAD

Waxaa la baaba'shay sharci kasta oo kan ka soo horjeeda amase la socon karin.

QODOBKA 4AAD

Xeerkan wuxuu u dhaqan gelayaa si deg deg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1. 9. 1979

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lam. 1 Bog. lamb. 119,

Muqdisho 15 Disember 1979,

Hantidhawrka Guud K. MG.

Yuusuf Cawi Nuur

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

OGEEYSIIS ISU YEERID

Waxaa Samileyda «Shirkadda Ganacsiga Guud ALLAMA-GANS» la wada ogeysiinayaa in maalinta 10 ee bishu Disember 1979, saacaddu markay tahay 4.30 gelinka dambe iney isugu yimaadaan Xarunta Shirkadda ee ku taal Degmada Hawlwa-daag, Waddada Kacaanka ee Muqdisho.

Ujeeddada yeeriddaas waa inta soo socota;

- 1) Kordhinta Raasumaalka Shirkadda ;
- 2) Cusbooneynta Guddiga Maamulka Sare;
- 3) Cusbooneynta Guddiga Xisaab Baarista;
- 4) Wixii kale oo la soo jeediyo.

Haddii fadhigaasi ansixi waayo waxaa dib loo dhigaayaa maalinta 18ka bishaas iyo isla saacaddaa iyo isla meesha kor lagu soo sheegay.

Muqdisho, 28 Nofeember 1979

MAAMULAHA IDMAN EE SH/DDA AL/GANS

Maxamed Maxamuud Axmed «Khaawi»